بســـــــــــــم الله الرحمن الرحيم

Dhalinta Baraarugu Ma Jihaadayaan Mise Xorriyadda Saxaafadda Ayay ku Kadsoomeen?

Hor Dhac

Marka hore Allaah baan ku mahadinayaa, marka xigana Nabigaan ku sallinayaa صلى الله عليه وسلم , intaa ka dib maqaalkaygii “Abu Fadumo Nasiixa Ma Mudan Yahay” ujeedadii aan ka lahaa waan ka gaaray taas oo ahayd inaan walaalkaas u naseexeeyo wadada wanaagsana u tilmaamo si isna uga badbaado dunuubta uu dhex dabaalanayo isagoo magaciisii qarsaday, anna aan ajar uga helo, walaalaha soomaaliyeed ee muslimiinta ahana ugu baraarugaan sida loogu tumanayo xuquuqdii guud iyo tii gaar ahaaneedba, iyadoo xadgudubkaas magac wanaagsan la siinayo kaasoo ah al-jihaadu fii sabiilillaah.

Abuu Fadumo inuu nasiixadayda qaato iyo inuusan qaadan wax anigu aan xukumo maahan waayo tawfiiqda Allaah baa iska leh القصص "إنّك لا تهدي من أحببت ولكن الله يهدي من يشاء". Saas oo ay tahayna waxaan Allaah nooga wada baryayaa inuu xaqa na wada wafajiyo naguna mideeyo. Wallaalo badan baa igula taliyay in aanan waqti isaga lumin u nasiixaynta walaalkaan iyo dadka la midka ah maadaama ay yihiin kuwa diiday nasiixadii loona qurxiyay camalkooda xun, waxaanse naftayda iyo walaalahayba xasuusinyaa Allaah qowlkiisii ahaa "وإذ قالت أمّة منهم لم تعظون قوماً الله مهلكهم أو معذبهم عذاباً شديداً قالوا معذرة إلى ربّكم ولعلّهم يتقون, فلمّا نسوا ما ذكّروا به أنجينا الذين ينهون عن السوء وأخذنا الذين ظلموا بعذاب بئيس بما كانوا يفسقون" الأعراف 160-161

Jawaabtii laga bixiyay nasiixada iyo mahad celin

Waxaan u mahad celinayaa walaalihii rayigooda cabbiray iigana garaabay cabashada aan ka soo gud biyay gacan dhaafka uu Abuu Faduma ka sameeyay qadiyada shahiidka Sh.Dr Axmed Xaaji Cabdiraxmaan raximahullaah, wananan dareensannahay ehelkiisii haddaanu nahay inuusan shiikhu kaligeen naga dhiman ee uu ummadda soomaaliyeed iyo muslimiintaba ka dhintay ee ajarkeenna Allaha wayneeyo.

Mida xigta maqaalkii waxaa looga soo jawaabay magac qof dumar ah oo lagu sheegay Mariam Sh Nur Ali . Qaraa’in badan oo ku xeeran baa shaki galinaysa jiritaanka gabadhaas magaca quruxda badan wadata. Waxaana ka mid ah:

- Meesha laga soo diray jawaabta oo Boosaaso ah iyo waqtiga la soo galiyay maqaalka time difference ka u dhexeeya meesha aan joogo oo aad u yaraa.

- Degdegga lagu soo jawaabay waqtigaaas oo Boosaaso ay habeen u ahayd iyadoo la wada garanayo duruufta boosaaso xag coronto joogto ah iyo mid internetba.

- Intaas waxaad ku dartaa magaca sida loo hikaadiyay waayo anigu haddaan boosaaso joogi lahaa saas uma hikaadiyeen magacayga haddaanan document raacayn.

Si kastaba ha ahaatee haddaanba ka soo qaado inay Mariama tahay qofta jawaabta bixisay wax micna ah ii samayn mayso waxaana xaqiiqa ah inay is kaliftay walibana ay waxa aan shaqadeed ah ahayn faraha la gashay waayo hadalka iyada looma hayn af joogna looma adeego, waxaa ka sii darran intaas oo dhan qasadka mowduuca maysan fahmin orodna way ku dul martay, xammaasad iyo caadifad bayna meesha ku xaradhay. Sidaas daraadeed waxaan walaashay ugu naseexayn lahaa xadiithkaan. **"من حسن إسلام المرء تركه ما لا يعنيه"** haddayba jirto.

Haddaan u soo daadago mowduucaan dulucdiisa, Dhalinta baraarugtay ma jihaadayaan mise saxaafadda xorta ah bay ku kadsoomeen? Waa su'aal aan is waydiiyay ka dib markii aan arkay inay faraha kula jiraan waxyaabo badan oo diinteena xaniifka ah aan ku banaanayn, iyaguna ay ku doodayaan inay Allaah ugu dhawanayaan. Waxay walaaluhu ku jiraan howl aan kala go'a lahayn maalin iyo habeen, taasoo ah inay dhinac ka taageeraan dagaallada waddankii ka socda ee ay alshabaab kula dirirayso dowlad isku sheekta kmg ah iyo ciidamada africaanta ah ee ay wadato, dhinaca kalana ay dagaal kharaar oon naxariis lahayn ku hayaan culumadii soomaaliyeed ee hooyada u ahayd saxwada islaamka, fahamka saxiixa ah iyo towxiid kana allaah noogu soo dhiibay.

Sida aan ognahay, jihaadku waa dirwatu sanaamil islaam, waxaana Allaah u jideeyay in kalimaddiisu kor ku noqoto, waa wasiilo lagu waardiyeeyo fidinta risaalada Rabbi, laguna hubiyo inay gaartay adoomadiisa **" الله ابتعثنا لنخرج من شاء من عبادة العباد إلى عبادة رب العباد ومن ضيق الدنيا إلى سعة الدنيا والآخرة ومن جور الأديان إلى عدل الإسلام" قالها ربعي بن عامر لرستم قائد هرقل عظيم الروم في معركة القادسية .**

Jihaadku mar waa fardu kifaayah oo waa marka dadka qaar hadday u istaagaan, gudashada muhimmad daasna ay ku filan yihiin ummadda inteeda kale danbigu waa ka dhacayaa.
"وما كان المؤمنون لينفروا كافة فلولا نفر من كل فرقة منهم طائفة ليتفقهوا في الدين ولينذروا قومهم إذا رجعوا إليهم لعلهم يفقهون التوبة

Mar kalena waa fardu cayn qof walba laga rabo, waana marka ay ku soo xadgudbaan dhulka muslimiinta gaaladu, in laysugu tago mooyaane aan si kale lagu dafcin Karin gaalada soo weerartay dhulkii muslimiita."[1] **انفروا خفافا وثقالا وجاهدوا بأموالكم وأنفسكم في سبيل الله..." التوبة**

Ujeedadaydu maahan inaan jihaadka iyo qaybihiisa ku sharraxo halkaan laakin waxaan rabaa inaan is xasuusino dhibaatadeennu haddan soomali nahay siday ku bilaabatay, taasoo ahayd jabhadihii qabaliga aha iyo xuruubtii ahliga ahayd ee cadowgu hoosta ka afuufayay ee ku xigay. Waxaynu wada ognahay heerarkii dhibaatadu inala soo martay, sidaas oo ay tahay maanta maalin ay igal xun tahay ma jirto, waayo dagaal nooc cusub ah ayaa ka socda waddankii oo wixii qabqable dagaal waylaat na soo mar siiyay baa soo noqday, markaasaa shacabkii markale waxaa u bilowday qarxin ku cusub iyo qaxid hor leh, laakiin markaan bi'ismi diin, cadowgii markii hore daah gadaashiisa taagnaa shirarka beenta ahna inoo qaban jiray markaan ciidamo qalabkoodu u dhan yahay buu inoo soo diray .

Waxyaabaha naxdinta badan waxaa ka mid ah cadawga gudaha u soo galay waddankeenna kuma soo galin magac gumaysi ee wuxuu ku soo galay magac ah inuu innaga ina kala celinayo, nabad galyadii iyo kala danbayntiina inoo soo celinayo, maatadeenna gaajaysanna hubinayo in deeqda bani aadanimo ay gaarto. In badan oo ina ka mid ahna way rumaysteen arintaas, waxayna aamininsan yihiin inay danteena

u yimaadeen aynuna u baahanahay in naloo soo gurmado, sababtuna waxaa weeye waxaa badankeen ka dhaadhacsan inaynaan kaligeen wax isla fahmi karin.

Maxaa xal ah hadaba , Jihaadse ma u baahan yahay waddanku?

Xalku waa innagoo Rabbigeen u toobad keena afraad iyo jamacadba. Waa inaan waxaan isku khilaaf sanahay u celino kitaabka iyo sunnada Nabiga scw. ka dibna innagoo Ilaah talada saaranayna adeegsana xikamdeenna iyo caqligeena sidii aynu uga soo bixi lahayn godkan aynu ku dhacnay. Midda kale, jihad ma u baahan yahay waddanku? Haah, jihaad waa u baahan yahay waddanku, mase ahan- aragtidayda- jihaadka hadda socda ee musallax ah. Waa jihaadka islaaxinta dhexdeenna iyo raadinta midnimadeen na. Aniga aragtidayda waa kaas jihaadka aynu u baahnayn tan iyo maalinkii waddankeennu bur buray.

"يسألونك عن الأنفال قل الأنفال لله والرسول فاتقوا الله وأصلحوا ذات بينكم وأطيعوا الله ورسوله إن كنتم مؤمنين"

"وأطيعوا الله ورسوله ولا تنازعوا فتفسلوا وتذهب ريحكم واصبروا إنّ الله مع الصّابرين" الأنفال:46

Waddankii oo kala daadsan, shacabkii oo ku dhibaataysan meel walba ayaa koox dadkii ka mid ah jihad ku dhawaaqday ayagoo ku doodayo in gaalada layska cesho, hasa yeeshee ummad meel ka soo wada jeedda baa gaalada iska celin karta!. Hal askari haddii laga dilo gaaladii ,toban rayid ah ayaa madaafiicdii lagu furay ku dhimatay., toban gaalo ah hadday dhimatana boqol muslimiin ah iska dheh waa qiyaase. Shacabkii fadhi uma yaal qax hor leh, su'aashuse waxay tahay xagay u qixi doonaan? Waxay aadeen wadamadii dariska ahaa iyo gaaladii ku soo duushay waxayna ku biireen haddiba loo ogolaao walaala hoodii labaatanka sano ka hor xeryaha looga ooday wadamadaas sida: ifa , dhagax dheer, jaxiima (Yeman) iwm. Ha ku darin tahriibta aan kala go'a lahayn oo dhalin yaradii ku halaagsan tahay badaha iyo saxaaraha north Africa

Gunaanad

Gabagabadii waxaa ku waajibay wax garadka ummaddeenna sida culumada diinta, aqoon yahanka duuqowda, dhalin yarada iyo haweenkaba inay u istaagaan in xal la helo. Culumadu waa inay Ilaah uga baqaan xilka ka saran masiirka ummaddan, xaqana cadeeyaan una naseexeeyaan dadka. Dhalinta baraarugga waxaa iyagana ku waajib ah in saxaafadda xorta ah ay u adeegsadaan islaaxinta mujtamaca, baraarujintiisa iyo isu soo dhawayntiisa. Dhalintu waa inay joojiaan dacaayadaha iyo af xumada ay ku hayaan culumada diinta, waayo culumada ceebaynteedu kuma ekaanayso iyaga oo kaliya waxay u gud baysaa waxay xambaarsan yihiin. Arintasi waxaa ka dhalanaysaa in xurmadii diinta loo hayay ay meesha ka baxdo ama yaraato, ummadiina sii kala fogaato. Sidaas daraadeed waa inay damiyaan camaradaha iyo recorada ay culumada la daba joogaan xataa hadday joogaan baytkii Ilaah ceebohoodana ku gooba yaan, kuna badadlaan inay raadiyaan xalkii iyo daawadii waddanka iyagoo ka tala qaadanaya culumada. Islaamku wuxuu inoo jedeeyay isu nasiixaynta iyo is toosinta waana ina ka xarrimay xanta, namiimada, raadinta ceebaha muslimiinta iyo been abuurka. Qofkii mooda inuu arimahaas diin Ilaah ugu adeegayo wuu is moodsiiyay.

Intaa ka dib halkaan waxaa ku lifaaqan erayo duco iyo dacwad isug jira oon dhowr sano ka hor aan ka iri qabqablayaashii dhibka badnaa ee waddanka soo maray walina raadkoodi muuqdo, waxayna taabana yaan cid walba oo dhaqankoodii yeelata.

Allaheen dal jalaalow ducaan kuu soo dirsanay

Duruufaha na soo maray kaama daahanee

Duulaan noo nixin iyo nacab baa na daashadee

Damiir laawayaal nagu diiroo la soo dirsaday

Ducafadii iyo shacabkii aan u diirnaxayn

Dakana iyo culaadna aan ka daalahayn

Waxay doonayaanna aanay dani noogu jirin

Ayaa na daashaday gugii iyo dayr walbaba

Dacwaan ka soo dirnaye dulmigooda naga dulqaad

Oo Allow dowlad khayr qabtoo diirran noogu deeq

Alloo madax daacadoo noo damqata na sii

Allow dulligaan marniyo daalku naga haraa

Oo adigu diiftiyo darxumadaan naga dawee

Allaheen dal jalaalow ducaan kuu soo dirsanay

Allow dadwaynahayaga qalbigooda daawa gali

Oo dirirtiyo culoodii nabad ay ku doorsadaan

Danbi wixii dhacayna toobad ay ku doorsadaan

Dardaarnkaagiyo diintaada daba galaan

Oo dulmile iyo qabiilka ka daba haraan

Oo dar Ilaahay cadaaladda daafacaan

Oo wixii u daran iyo danahooda kala duw

Oo diir walaalnimiyo ilaanimo is dugsadaan

Aloow dowlad khayr qabtoo diirran noogu deeq

Allow madax daacadoo noo damqata na sii

Allow dulligaan marniyo daalku naga haraa

Oo adigu diftiyo darxumada naga dawee

Allaheen dal jalaalow ducaan kuu soo dirsanay

Diintaadoo daahirtiyo iimaan nagu daryeel

Dugsi qabowo na wada deeqa nooga yeel

Dihaalkii iyo dhibkii aan ka doogsannee

Oo dalkayagii doorranaa dib ugu laabane

Qarankeennii kala duday isu soo dunnee

Oo da'yartii la dayacay dib u toosinnee

Duqowdiyo waayeelkana aan daryeelanne

Aloow dowlad khayr qabtoo diirran noogu deeq

Allow madax daacadoo noo damqata na sii

Allow dulligaan marniyo daalku naga haraa

Oo adigu ddiftiyo darxumada naga dawee

Cubtanyusuf@yahoo.com